**JAMHUURIYADDA SOMALILAND**

**REPUBLIC OF SOMALILAND**

**XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA**
**SOLICITOR GENERAL OFFICE**

# FAAFINTA RASMIGA AH
# OFFICIAL GAZETTE
# ألنّشرة الرّسمية لجمهورية صوماليلاند



| | | |
|---|---|---|
| *Sannadkii 11aad* | *Cadad Gaar ah* | *Tariikhda Daabacada 26/03/2022* |



# XEERKA ISTAATISTIKADA JAMHUURIYADDA SOMALILAND
# XEER LR.60/2013


**Email: garyaqaankaguud@gmail.com**
**Web.www.garyaqaankaguud.com**


*Lama iibin karo*
*Not for sale*

*Sannadka 2022*

**REPUBLIC OF** **SOMALILAND**

## THE PRESIDENT

REF. JSL/M/XERM/249-1794/062013 DATE 16/06/13

# XEER MADAXWEYNE Lr: 0312/062013

## Dhaqan-galka Xeerka Istaatistikada (Statistics Law) Xeer Lr. 60/2013

## Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

**Markuu Arkay:** Qodobka 90aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;

**Markuu Arkay:** Qodobka 75aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;

**Markuu Arkay:** Go'aanka Golaha Wakiillada JSL, go'aan Lr. GW/G/KF-21/593/2013 ee ku taariikhaysan 28/05/2013 ee ay ku ansixiyeen Xeerka Istaatistikada (Statistics Law) Xeer Lr. 60/2013.

**Wuxuu Soo Saaray**

**Dhaqan-galka Xeerka Istaatistikada (Statistics Law) Xeer Lr. 60/2013 ee Jamhuuriyadda Somaliland.**

**Allaa Mahad Leh,**

REPUBLIC OF SOMALILAND President

**Axmed Maxamed Silanyo**
**Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland**

Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Qaranka
Qoraalkan waxa laga Diiwaangeliyey
Xafiiska Maanta 17/06/13
Lambarka: 068
Saxeex:

Ref: GW/G/KF-21/593/2013 Date: 28/05/2013

**Ujeedo-** **Go'aanka Ansixinta Xeerka Istaatiskada (Statistics Law) Xeer Lr.60/2013**

## GOLAHA WAKIILADA JSL

**Markuu Arkey:** **Qodobadda 53aad iyo 11aad** ee Dastuurka Jamhuuriyada Soomaaliland.

**Markuu Dersey:** Ahmiyada ay leedahay in tirakoob sugan (statistics) lagu sameeyo dhamaanba adeegyadda muhiimka ah ee bulshada Jamhuuriyada Somaliland.

**Markuu Ku Qancey:** in baahi wayn loo qabo in lasameeyo xeer suga tirakoobka, isku dubaridda, kala-gura xogta tirakoobka cayiman ee dhamaanba adeegyadda muhiimka ah ee bulshada JSL.

**Markuu Aqoonsadey:** Danta iyo maslaxada qaranka Jamhuuriyada Soomaaliland aya u leedahay in la helo xeer ururiya dhamaanba daraasadaha Istaatistikadda cayiman ee Qaranka Jamhuuriyadda Somalialnd.

**Markuu arkay:-** Go'aanka ansixinta **Xeer Lr. 60/2013** ee Golaha Wakiiladu u gudbiyeen Golaha Guurtida ee ku taariikheysan **21/01/2013.**

**Markuu arkay:-** Go'aanka ansixinta Xeer Lr. 60/2013 ee Golaha Guurtida SL kuna taariikheysan **03/30/2013**

**Markuu Tixgaliyay:-** Nuxurka Wax ka-badalka iyo Kaabista Golaha Guurtidu ku soo sameeyeen kuna ansixiyeen Cod dhan **(37 cod)** todoba iyo sondon Cod oo gacan taaga **Xeerka istaatikada ee Xeer Lr. 60/2013. Taariikhduna ahayd 03/03/2013**

**Markuu u Codeeyay:-** Golaha Wakiiladu **Xeerka istaatikada JSL kal-fadhigii** $21^{aad}$ **fadhigiisii** $11^{aad}$ ee **12/05/2013** oo ay goob joog ahaayeen **(46)** Mudane oo ka mid ah mudanayaasha Golaha Wakiilada.

## <u>WUXUU</u>

Cod aqlabiyadd ah oo sodon iyo sagaal **(39 cod)** mudane gacan tag ku Ansixiyay **Xeerka Istaatiskada Xeer Lr. 60/2013,** halka Cid Diidcyna aanay jirin, lix (6) mudane ay ka aamuseen, Gudoomiyuhuna muu codayn sida caaddada ah.

## <u>ALLAA MAHAD LEH</u>

C/risaaq Siciid Ayaanle
Guud ee Golaha Wakiilada JSL

Baashe Maxamed Faarax Xoghayaha
ku-simaha Gudoomiyahah ahna
ku-xigeenka laad ee Golaha Wakiilada JSL

## GOLAHA WAKIILADA:

**Markuu Arkey:** **Qodobadda 53aad iyo qodobka** $11^{aad}$ ee Dastuurka Jamhuuriyada Soomaaliland.

**Markuu Arkey:** **Xeerka Istaatistikadda** ee ay soo gudbiyeen **Golaha Wasiirada** JSL

**Markuu Dersey:** Ahmiyada ay leedahay in tirakoob sugan (statistics) lagu sameeyo dhamaanba adeegyadda muhiimka ah ee bulshada.

**Markuu Tixgaliyey:** Talooyinka daneeyayaasha uu khuseeyo xeerkani.

**Markuu Ku Qancey:** in loo baahan yahay xeer suga tirakooba, isku dubaridda, kala garu dhamaanba xogta tirakoobka cayiman ee dhamaanba adeegyadda muhiimka ah ee bulshada Jsl.

**Markuu Aqoonsadey:** Danta iyo maslaxada qaranka Jamhuuriyada Soomaaliland in ay lagama maarmaan tahey in la helo xeer ururiya dhamaanba daraasadaha Istaatistikadda Qaranka Jamhuuriyadda Somalialnd.

**Markuu arkay: -** Go'aanka ansixinta Xeer Lr. 60/2013 ee Golaha Guurtida SL kuna taariikheysan **03/03/2013**

**Markuu Tixgaliyay: -** Nuxurka Wax ka-badalka iyo Kaabista Golaha Guurtidu ku soo sameeyeen kuna ansixiyeen Cod dhan **(37 cod)** todoba iyo sondon Cod oo gacan taaga **Xeerka istaatistikada ee Xeer Lr. 60/2013. Taariikhduna ahayd 03/03/2013**

Waxa Uu Soo Saarey:

**Xeerka Istaatistikadda (Statistics Law)**

**Xeer Lr: 60/ 2013**

## CUTUBKA 1AAD

## HORDHAC

### Qodobka 1aad

### Magaca Xeerka

Xeerkan waxaa lagu magacaabayaa **'Xeerka Istaatistikada' Jamhuuriyadda Somaliland (The Statistics Law of the Republic of Somaliland).**

### Qodobka 2aad

### Erey-Bixin

Haddii aan nuxurka xeerkan si kale loogu xusin, ereyadan waxaa loo fasirayaa sidan:

**"WAAX(*Department*)":** waxaa loola jeedaaWaaxda Istaatistikada ee Wasaaradda Qorshaynta iyo horumarka Qaranka;

**"ISTAATISTIKADA CAYIMAN *(Designated Statistics)*":** waxaa loola jeedaa liistada Istaatistikada ku cad lifaaqa (B) ee la socda Xeerkan;

**"QOF (*Person*)":** waxaa loola jeedaa shakhsiyadda qaanuuniga ah wuxu noqon karaa qofka Bani Aadamka ah, shirkad, wasaarad, iskaashato, urur samafal, ama haykal kasta oo leh jiritaan, astaan iyo shakhsiyad qofnimo qaanuuneed oo Xeerarka dalku aqoonsan yahay,

**"XEER NIDAAMIYE (*Regulation*)":** waxaa loola jeedaa waa xeer nidaamiyaha lagu soo saari doono si waafaqsan Xeerkan;

**"WASIIR *(Minister)*":** waxaa loola jeedaa Wasiirka Wasaaradda Qorshaynta iyo Harumarka Qaranka;

**AGAASIME (*Director)*:** waxaa loola jeedaa Agaasimaha Waaxda Istaatistikada ee Wasaarada Qorshaynta iyo Horumarka Qaranka.

**GUDDIDA:** Waxaa loola Jeeda Guddida La-talinta Statistikada

### Qodobka 3aad

### Dabaqaadda

Xeerkan waxa lagu dabaqayaa Istaatistikada Cayiman oo keliya, Lagu dabaqi maayo Istaatistikada la xidhiidha Difaaca iyo arimaha nabad Sugidda.

## CUTUBKA 2AAD

## WAAXDA ISTAATISTIKADA

### Qodobka 4aad

### Qaab-dhismeedka

1. Waaxda Istaatistikada ee ka tirsan Wasaaradda Qorshaynta iyo Horumarka Qaranka ayaa wixii iminka ka dambeeya loo aqoonsanaan doona 'Waaxda Istaatistikada;



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA
FAAFINTA RASMIGA AH

2. Waaxdan waxaa madax ka noqonaaya Agaasime, kaasoo leh sifooyinka ku qeexan Xeerka Shaqaalaha Dawladda, isla markaana u leh khibrad hawlaha Istaatistikada.

## Qodobka 5aad

## Hawlaha Shaqo ee Waaxda

1. Iyadoo la tixraacayo Istaatistikada la cayimay, ayey Waaxdu:

**b.** Ururinaysaa, isku dubaridaysaa, kalaguraysaa, bandhigaysaa, faafinaysaa ama daabacaysaa macluumaadka Istaatistikada;

**t.** Abaabulaysaa, samaynaysaa Tirakoob iyo Sahamo kale keligeed ama iyada oo kaashanaysa wasaaradaha, maamulada gobolada iyo degmooyinka, iyo hay'adaha madaxa banaan;

**j.** Samaynaysaa baadhitaan Istaatistika ah;

**x.** Samaynaysaa erey-qeexid (definitions), hab kalagurid ama kala-saarid (classification) iyo hab raac (procedure) ay raacaan wasaaradaha, dawladda hoose, hay'adaha madaxa banaan iyo ciddii kale ee ku hawlan ururinta iyo kala gurka Istaatistikada.

**Kh.** Kormeereysaa isla markaana ay isku duwaysaa hawlaha Istaatistikada ee ay sameeyaan dhamaan Wasaaradaha, maamulada dawaladaha hoose iyo hay'adaha madaxa banaan;

**d.** Diyaarinaysaa dibna u eegeysaa qaababka Istaatistikada, qoraalada Su'aalo-sideyaasha iyo q oraalada (Documents) kasta oo laga leeyahay ujeedooyin Istaatistiko ah;

**r.** Horumarinaysaa isla markaana taageeraysaa hawlaha Istaatistikada ee ay wadaan hay'adaha aan Dawliga ahayni si waafaqsan Shuruudaha ku xusan Xeerkan iyo xeer nidaamiyeyaasha kale.

## Qodobka 6aad

## Awoodda iyo Waajibaadka Agaasimaha

1. Agaasimuhu wuxu kormeerayaa, isla markaana masuul ka yahay dhamaan hawlaha waaxda.
2. Agaasimuhu wuxuu kaloo yeeli karaa:

**b)** In uu u igmado ama u xilsaarto hawlqabad ku saabsan Istaatistikada cayiman saraakiil kale oo ka tirsan Waaxda;

**t)** In uu u gudbiyo Wasiirka soo jeedimo talo-bixineed oo ku saabsan magacaabis gudiyo la taliyaal iyo kuwo farsamo oo kala taliya Wasiirka caqabadaha guud iyo kuwa gaarka ahba ee la xidhiidha mawduuca istaatistikada;

**j)** Inuu awood u siiyo Sarkaal kasta oo ka tirsan Waaxda inuu galo saacadaha u dhexeeya Cadceed soo baxa iyo Cadceed dhaca goob kasta ama Gaadiid kasta isagoo fulinaaya ujeedooyinka la xidhiidha ururinta xogta Istaatistikada.

3. Waxaase Shardi ah haddii goobtu ay tahay guri la degenyahay isla markaana ay jirto diidmo gelitaan waa in sideed iyo afartan saacadood oo ogeynsiin ah la siiyo.
4. Isla markaa, haddii goobtu tahay guri ay degen yihiin dumar, waa in la siiyo fursad kasta oo ay meel isku qariyaan ama jidhkooda ku asturaan.



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA
FAAFINTA RASMIGA AH

## CUTUBKA 3^AAD

## SIRTA

### Qodobka 7^aad

### Qarsoodiga Xogta

Dhamaan xogaha lagu helo iyada oo la raacaayo qodobada Xeerkan ama xeer-nidaamiyeyaasha la xidhiidha waa in loo tixgeliyaa sir qaran, waana inaan loo bandhigin cid kasta oo aan fasax u haysan, marka laga reebo arimaha waafaqsan ujeedooyinka Xeerkan ama amar maxkamadeed.

## CUTUBKA 4^AAD

## QODOBADA CIQAABTA

### Qodobka 8^aad

### Xog-bixinta aan banaanayn

1. Qof kasta oo:

**b)** Shaqaale ka ah Waaxda oo qof siiya xog qof kale ku saaban oo uu ku helay isaga oo gudanaaya shaqadiisa fasax sharciyana u haysan bixinteeda; ama

**t)** Haysta xog uu ogyahay in ay ku baxday sifo aan sharci ahayn qof kalena u sii gudbiyaa wuxuu mutaysanayaa dambi ciqaabeed, ciqaabtuna waxaynoqonaysaa ganaax dhan **Sl.sh 500,000 illaa Sl.sh 1,000,000 (Shan boqol oo kun ilaa Hal Milyan oo Shiling JSL)** ama xadhig aan ka badnayn lix bilood ama labaddaba.

### Qodobka 9^aad

### Dembiyo kale

1. Qof kasta oo:

**b)** Diida inuu bixiyo jawaab ama si ula kac ah jawaab been ah ka bixiya su'aal la weydiiyo si loo helo xog loo baahan yahay iyadoo la dhaqan gelinaaayo Xeerkan

**t)** Si ula kac ah uga sameeya qoraal been ah xog looga baahan yahay sifo la xidhiidha Xeerkan ama xeer nidaamyadiisa;

**j)** Diida ama isaga oo aan haysan cudur-daar sharci ah ka hawl yaraysta ama u dhaqma si ku lid ah Xeerkan ama Xeer-nidaamyadiisa, wuxuu galayaa fal dembiyeed uu ku mutaysanaayo ganaax aan ka badnayn **Sh.300,000** ama xadhig aan ka badnayn sadex bilood ama labadaba.

2. Qofna laguma soo Oogi karo dembi ciqaabeed iyadoo loo cuskanaayo Xeerkan haddii aanay cabasho qoraal ihi ka soo bixin agaasimaha ama sarkaal kale oo loo awood siiyey.

### Qodobka 10^aad

### Guddida La-talinta Istaatistikada

1. Waxaa la samaynayaa Guddida La Talinta Istaatistikadda oo uu gudoomiye u yahay agaasimaha guud kana kooban xubnaha soo socda:



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA FAAFINTA RASMIGA AH OFFICIAL GAZETTE

b) Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Qorshaynta iyo Horumarka Qaranka

t) Guddoomiyaha Banka Dhexe;

j) Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Maaliyadda;

x) Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Warfaafinta;

kh) Agaasimaha Waaxda Qorshaynta ee Wasaaradda Shaqada iyo ArrimahaBulshada;

d) Agaasimaha Waaxda Qorshaynta ee Wasaaradda Waxbarashada iyo tacliint sare;

r) Agaasimaha Waaxda Qorshaynta ee Wasaaradda Beeraha;

s) Agaasimaha Waaxda Qorshaynta ee Wasaaradda Kaluumaysiga iyo Khayraadka Badda;

sh) Agaasimaha Waaxda Qorshaynta ee Wasaaradda Ganacsiga iyo Dalxiiska;

dh) Agaasimaha Guud ee Hay'adda Shaqaalaha Dawladda;

c) Wakiil ka socda Jaamacadaha Dalka;

g) Agaasimaha Waaxda Istaatistikada ee Wasaaradda Qorshaynta iyo Horumarka Qaranka;

f) Wakiil ka socda Ururada Bulshada Rayidka ah.

## Qodobka 11aad

## Awoodaha Gudidda

Awoodaha Guddidu waa inay:

1. Dib u eegis ku samayso Xeerarka ay diyaariso Wasaaradu ee waafaqsan xeerkan ee u baahan ansixinta golaha wasiirada iyo baarlamanka.
2. Isku-dubarido deddaaladda loogu jiro ururinta iyo kala-gurka macluumaadka la xidhiidha istaatistikada.
3. Si gaar ah u gudato arrimaha soo socda:

    b) Ansixinta qorsheyaasha istaatistikada ee fog ee la xidhiidha arimaha dhaqaalaha iyo bulshada, qorsheyaasha sanadlaha ah ee ay diyaariyaan Wasaaradaha iyo xubnaha kale ee Dawladdu;

    t) Xidhiidhinta hawlaha istaatistikada ee ka socda Jamhuuriyadda Somaliland (JSL).

    j) Go'aaminta kala mudnaanta daraasadaha istaatistikada, sahaminta iyo tirakoobka dadka iyadoo la tixgelinaayo baahiyaha kala duwan iyo qorsheyaasha qofeed ee Dawladda;

    x) Isku jaangoynta aragtida iyo ereyada istaatistikada ee laga isticmaalo dalka Jamhuuriyadda Somaliland, iyo kormeerka dhaqangelinta soo jeedimaha caalamka ee la xidhiidha arimahaas.

    Kh) Qeexidda habraaca hawlgaladda istaatistikada iyo habka farsamo ee loo diyaariyo loona daabaco natiijooyinka istaatistikada si kor loogu qaado tayada iyo dhakhso soo saarida istaatistikada rasmiga ah.



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA
FAAFINTA RASMIGA AH
OFFICIAL GAZETTE
SOLICITOR GENERAL OFFICE

d) Dib u eegista kharashyada ku baxa hawlgalada istaatistikada ee ay xubnaha dawladdu sameeyaan iyo talo u soo jeedinta cidda ay khusayso

r) Dhiirigelinta cilmi baadhista iyo daraasadaha istaatistikada ee ku saabsan aagaga iyo heerarka kala duwan; Ka hawlgalka kor u qaadista, wacyigelinta istaatistikada si loo xaqiijiyo diyaarinta dad innagu filan oo aqoon u leh istaatistikada

s) Ansixinta daabacaada natiijooyinka rasmiga ah ee istaatistikada ee ku soo baxa qoraalada xilayaysan ama khaaska ah, marka laga reebo natiijooyinka ay guddidu u aragto in ay yihiin sir.

4. Gudidu waxay talo ka raadin kartaa khubaro kala duwan taas ku xidhan hadba baahidooda iyo marba arinka ay gacanta ku hayaan.

## CUTUBKA 5AAD

## QODOBADA UGU DAMBEEYA

### Qodobka 12aad

### Awoodda wax-ka-bedelka liistada staatistikada cayiman

Wasiirku wuxuu digreeto uu ku daabaco Faafinta Rasmiga ah ee dawladda ka soo saari karaa wax ka bedelka Liistada cayiman (*Schedule*) ee Xeerkan ku lifaaqan si waafaqsan qodobka 3aad ee Xeerkan.

### Qodobka 13aad

### Xeer-nidaamiye

Wasiirku wuxuu digreeto uu ku daabaco Faafinta Rasmiga ah ee dawladda ka soo saari karaa Xeer-Nidaamyo lagu dhaqangelinaayo Xeerkan.

### Qodobka 14aad

### Tirtirid

Waxaa la tirtiray dhammaan Xeer kasta iyo qodob ama qodobo kasta oo ka soo horjeeda ama aan la socon Karin Xeerkan.

### Qodobka 15aad

### Dhaqan-Galka

Xeerkani wuxuu dhaqan gelayaa marka golayaasha sharci-dejintu ansixiyaan madaxweynuhuna Saxeexo laguna soo saaro faafinta rasmiga ah.



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA
FAAFINTA RASMIGA AH
OFFICIAL GAZETTE
SOLICITOR GENERAL OFFICE

**Shaxda Lifaaq ('B')**

**(Schedule A)**

**Istatistikada Cayiman**

1. Tirade dadka iyo guryaha (***population and housing)***
2. Dhoofka-gelid iyo bixid (***immigration and emigration)***
3. Dhalashada Dhimashada, guurka iyo furriinka. (***birth, death, marriages and Divorces)***
4. Cudurada faafa, tamardarada iyo arrimaha kale ee la xidhiidha caafimaadka (***epidemiology, morbidity and related health statistics)***
5. Muruqmaalk, shaqaynta, shaqo la'aanta iyo arimaha kale ee xidhiida shaqada ***(manpower, employment, unemployment and other matters about labour)***
6. Xoolaha (***livestock)***
7. Beeraha oo ay ku jiraan kuwa khudrada, dhirta, caanaha iyo kalluumaysiga (***agriculture, including horticulture, forestry, dairy and fishing)***
8. Waraabka iyo soo saarka biyaha (***irrigation and water supply)***
9. Lahaansha dhulka iyo isticmaalkiisa ***(land tenure and utilization)***
10. Macdan soo saarista, dhagaxqodida (***mining and quarrying)***
11. Xogta saadaasha Hawada **(meteorology data)**
12. Warshadaha **(Manufacturing)**
13. Farshaxanka iyo wax soo saarka farsamayaqaanada reer miyiga (***handcrafting and rural industries)***
14. Dhismayaasha iyo wixii la xidhiidaha (***construction and allied activities)***
15. Shidaalka iyo tamarta (***fuel and energy)***
16. Gaadiidka (dhulka, baddaiyo hawada) iyo isgaadhsiinta (***transport land, air and sea, and communication)***
17. Ganacsiga gudaha iyo ka dibadaba (***internal and external trade)***
18. Waxbarashada ***(education)***
19. Cisbitaaladda, kilinikyada, farmasiiyada cusbitaalada dhimirka ***(hospitals, dispensaries and mental institutions)***
20. Adeegyada bulshada, ganacsiga, madadaalada, ciyaaraha, iyo adeegyada gaarka ah (***community, business, recreationl, and personal Services)***



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA
FAAFINTA RASMIGA AH
OFFICIAL GAZETTE
SOLICITOR GENERAL OFFICE

21. Mushahaarooyinka billaha, mushaharka yoomiyaha ah, fiiga iyo lacag-biximaha kale ee lagu helo hawl qabad adeegyo ***(salaries, wages, bonuses, fees, and other payments for services rendered).***

22. Dakhliga, Lacagaha la xoogsado, faa'iidada iyo dulsaarka (***income, earnings, profits and intrests).***

23. Wax soo saarka, kaydka, iibka, qaybinta iyo faahfaahin ku saabsan adeegyada (***output,stocks,sales and deliveries and details relating to services rendered)***

24. *Qaabdhismeedka maalgashiga* ***(capitol formation)***

25. Baananka, caymiska iyo maaliyadda (dawlad io gaar) (***banking, insurance, finance (public and private)***

26. Ascaarta kirooyinka iyo qiimaha nolosha ***(Price, rents and cost of living).***

27. Kharashka ku baxa qofka iyo daboolka baahiyaha nololeed ***(persnel expenditure and consumption)***

28. Caddaaladda, dembiyada iyo jeelasha ***(justice, crimes, and prisones)***

C/risaaq Siciid Ayaanle
Xoghayaha Guud ee Golaha Wakiilada JSL
_______________________________

Baashe Maxamed Faarax
Ku simaha Guddoomiyaha ahna
Gudoomiye ku xigeenka 1aad ee G/Wakiilada JSL
_____________________________________



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA
FAAFINTA RASMIGA AH
OFFICIAL GAZETTE
SOLICITOR GENERAL OFFICE